Waa af-Soomaali

Trafikskadenämnden

# Baaritaanka guddiga dhaawacyada gaadiidka

**Haddii adiga ama xigtadaadu aad gaadiid ku dhaawacantaan Guddiga dhaawacyada gaadiidka ayaa baari kara magdhawga ay shirkadda ceymisku idinku siisay dhaawacyada qof ahaaneed. Maareynta kiiska ee guddigu waxay ku dhaceysaa luqadda Iswiidhishka. Baaritaanku waa lacag la'aan. Ra'yiga guddiga dhaawacyada gaadiidku wuxuu tala bixin u yahay shirkadda ceymiska. Guddiga dhaawacyada gaadiidku wuxuu baaritaan ku sameeyaa laba nooc oo kiisas ah; kiisas waajib ah iyo kiisas murun xallin ah. Waraaqahan warbixintu waxay ka hadlayaan kiisaska murun xallinta.**

### Kiisaska murun xallinta

Haddii lagu siiyay go'aan kama dambeys ah oo shirkaddaada ka socda oo aadan ku qanacsaneyn marka laga hadlayo lacagta dhaawaca qofka ee kaaga timid ceymiska gaadiidka, waxaad codsan kartaa in uu baaro Guddiga dhaawacyada gaadiidku. Kiiskaagu wuxuu markaas noqonayaa kiis lagu murunsanyahay.

### Aniga naftirkeygu codsi ma u diran karaa Guddiga dhaawacyada gaadiidka si loo baaro kiiskeyga?

Waa in shirkaddaada ceymisku ay inta aadna codsiga u soo dirin Guddiga dhaawacyada gaadiidka go'aan kama dambeys ah ka gaartay arrinka aad rabtid in aan baarno. Markaas ka dib waa in sidoo kale aad la xiriirtay shirkadda ceymiska oo aad isku dayday in aad ka keentid in ay wax ka beddelaan go'aanka aadna ku qanacsaneyn. Haddii shirkadda ceymisku aysan wax ka beddelin go'aanka oo aad ku heshiin waysaan, waxaad codsi u soo dirsan kartaa Guddiga dhaawacyada gaadiidka.

### Tusaale ku aaddan arrimo aad codsan kartid in baaritaan lagu sameeyo:

- In dhibaatooyinkaagu ay ka dhasheen shil gaadiid ama in kale
- Heerka, shilka gaadiidka ka dib, ay gaarisiisantahay cuuryaannimada la xiirirta dawada
- Dakhliga kaa lumay shilka ka dib
- In kiiskaaga uu waqgiisu dhamaaday iyo in kale

### Ururka ceymiska gaadiidka

Haddii uu Ururka ceymiska gaadiidku (TFF) kiiskaaga maareynayo, toos ulama xiriiri kartid guddiga dhaawacyada gaadiidka. Haddii aadan go'aan ku qanacsaneyn waxaad mar walba xaq u leedahay in uu baaryo Guddiga dhaawacyada gaadiidku. Waxaad markaas la xiriireysaa TFF oo kiiska u direysa Guddiga dhaawacyada gaadiidka si loo baarao. Aragtida Guddiga dhaawacyada gaadiidka waxaa adiga kuu soo direysa TFF.

### Sidee bey taaristu u dhaceysaa?

1. Si digital ah ayaad codsiga ugu diri kartaa Guddiga dhaawacyada gaadiidka ama waxaad daabacan kartaa foomka codsiga oo aad ku soo diri kartaa boostada. Foomka codsiga waxaad ka heleysaa bogga intarneetka ee Guddiga dhaawacyada gaadiidka, www.trafikskadenamnden.se. Waa in aad codsigaaga soo raacisaa go'aanka shirkadda ceymiska ee ku aaddan arrinka baaritaan lagu sameynayo. Wixi kale ee dhameystir ah la sug jawaabta shirkadda ceymiska ee ku aaddan codsigaaga. Markaas ayaad go'aan ka gaareysaa waxa aad rabtid in wax ku dhameystirtid.
2. Kiiskaaga waa la diiwan gelinayaa waxaadna heleysaa xaqiijin ku aaddan codsigaaga. Haddii aad Bank-ID haysatid waxaad si digital ah arrinkaaga ugula soconeysaa ”Mina sidor” adigoo

adeegsanaya bogga intarneetka ee Guddiga dhaawacyada gaadiidka. Haddii kale waxaa lagu wada xiriirayaa xagga boostada.

3. Shirkaddaada ceymisku waxay jawaabteeda u soo direysaa Guddiga dhaawacyada gaadiidka. Shirkadda ceymisku waxay soo raacinayaa waraaqaha ay doonayaan in ay tixraacaan baaritaanka Guddiga dhaawacyada gaadiidka ka hor.
4. Marka aad waxyaabahaas isha marisid waxaad kala ogaan doontaa in aad u baahantihid inaad wax soo dhameystirtid iyo in kale. Maskaxda ku hay in aad dhameystir ahaan u soo gudbin kartid oo keliya wax ay aragtay shirkaddaada ceymisku. Haddii aad tusaale ahaan rabtid in aad soo dirtid caddeyn dhakhtar waa in shirkaddaadu ay marka hore mawqif ka qaadataa.
5. Guddiga dhaawacyada gaadiidku wuxuu arrinkaaga ku eegi doonaa hal kulan, markaas ka dibna waxaa la qori doonaa ra'yi ay ku caddahay wixi u guddiga u soo baxay.
6. Baaritaanka ka dib adiga iyo shirkadda ceymiska ayaa la idiin soo dirayaa ra'yiga Guddiga dhaawacyada gaadiidka.

Goor kasta oo aad doontid waad la noqon kartaa codsigaaga inta uu gacanta ku hayo Guddiga dhaawacyada gaadiidku.

### Ilaa imisa ayuu qaadanayaa baaritaanka Guddiga dhaawacyada gaadiidku?

Marka ay dhammaadaan xiriirrada idin dhex maraya adiga iyo shirkadda ceymisku waxaa kiiskaaga lagu baarayaa 90 maalmood gudohooda. Mararka qaarkood waa la dheereyn karaa inta gacanta lagu haynayo kiiska.

### Luqaddee bey waraaquhu ku qornaanayaan?

Baaritaanka Guddiga dhaawacyada gaadiidku wuxuu ku dhacayaa af-Iswiidhish.

### Marka laga hadlayo wakiil sharci ahaaneed?

Waxaad yeelan kartaa wakiil ku caawiya inta uu socdo baaritaanka Guddiga dhaawacyada gaadiidku, laakin taasi maaha wax shardi ah. Haddii aad rabtid in aad wakiil heshid waxaa go'aan ka gaareysa shirkadda ceymiska haddii ceymiska gaadiidku uu kaa bixinayo kharashaadka wakiilka. Haddii kale adiga ayaa iska dhiibaya kharashka. Haddii uu jiryo wakiil waxaad u baahantahay in aad kiiska u siisid wakiilasho buuxda.

### Wax ma ka joogi karaa kulanka Guddiga dhaawacyada gaadiidka?

Adiga ama wakiilkaagu wax waad ka joogi kartaan marka arrinkaaga la eegayo. Waxaa baaritaanka la sameynayaa iyadoo laga duulayo dukuminiinyada qoraalka ah oo keliya.

### Ma khasabbaa in ay shirkaddeydu ceymisku raacdo ra'yiga Guddiga dhaawacyada gaadiidka?

Guddiga dhaawacyada gaadiidku wuxuu gudbinayaa aragti qoraal ah oo tala bixin ah. In aragtidu ay tala bixin tahay waxay ka dhigantahay in ceymisku uusan u baahneyn in uu ra'yiga raacyo. Waa wax aan caadi ahayn in shirkadda ceymisku aysan raacin aragtida.

### Ma ka dacwoon karaa aragtida Guddiga dhaawacyada gaadiidka?

Lagama dacwoon karo aragtida Guddiga dhaawacyada gaadiidka. Haddii aadan aragtida ku qanacsaneyn ama aysan shirkadda ceymisku u beddelin go'aankeeda si aragtida waafaqsan waxaad fursad u haysataa in aad u dacwootid maxkamad guud. Haddii ay sidaas noqoto waa go'aanka shiradda ceymiska waxa ay maxkamaddu eegeyso ee maaha aragtida guddiga. Waxaa la dabbaqi karaa xeerarka kiis xiridda. Wixi xog ah ee dheeraad ah marka laga hadlayo xaaladda noocaas ah waxaa habboon in aad kala xiriirtid shirkaddaada ceymiska.

**Wixii macluumaad ah ee dheeri ah waxaad ka heleysaa www.trafikskadenamnden.se**